



WASAARADDA ISGAADHSIINTA IYO TEKNOOLOJIYADDA

QIIMAYN IYO WARBIXIN KU SAABSAN XAALADA INTERNETKA DAWLADDA

Survey on Internet Connectivity in the Somaliland Government Institutions

FINAL REPORT

April, 2020

TUSMO

1.0 HORDHAC	2
2.0 INTERNET.....	2
2.1 XADDIGA INTERNET-KA AY WASAARADDUHU KA HELAAN SHIRKADAHA.....	3
2.2 SHIRKADAHA ADEEGA INTERNET-KA (ISP) SIIYA WASAARADDAHA XAWAARAHOODA	4
2.2 CILADAHKA INTERNETKA WASAARADAHA	5
2.3.1 LABADII WEEK EE UGU DANBEEYAY SIDA AY WASAARADDUHU ULA KULMEEN CILAD INTERNET	5
2.3.2 CILADA SIDAY SHIRKADAHA INTERNET-KU (ISPs) UGA JAWAAB CELIYAAN	6
2.4 CAQABADAHA INTERNET-KA WASAARADDAHA	6
2.4.1 CAQABADAHA GUUD.....	6
2.4.2 CAQABADAHA GAARKA AH.....	7
3.0 SHABAKADA (NETWORK).....	8
3.1 AMAAN AHAAN WASAARADDAHU QALABKOODU WAA SIDEEE	8
4.0 Qalabka (Devices).....	9
5.0 XALKA (SOLUTION).....	10
5.1 XALKA DHOW (SHORT TERM):	10
5.2 XALKA FOG (LONG TERM):.....	11

1.0 HORDHAC

Horaantii wiigii aynu soo dhaafnay waxa aanu bilaabnay qiimayn (Assessment), qiimayntaa oo aanu ku gaadaa bixinaynay wasaaraddaha dowladda Somaliland iyo madaxtooyadda waxa aanu ku eegaynay isku xidhka ama isku xidhnaanta wasaaraddaha , shirkadaha internet (ISP) ka bixiya iyo waliba caqabadaha Internet eek u gadaaman wasaaraddaha dowlada.

Qiimayntaa waxaa aanu wadnay muddo shan cisho ah, mudadaas oo aanu xog uruurin iyo indho indhayn aanu ku wadnay wasaaraddaha. Qiimayntaa waxa aanu si guud uga eegaynay sadex dhinac oo kala ah

- Internet-ga wasaaraddaha iyo qaabka ay u isticmaalaan
- Network-ga wasaaraddaha iyo qaabka uu u yaalo iyo sida loogu isticmaalo wasaaradda.
- Iyo ugu danbayntii qalabka lagu isticmaalo iyo noocyada ay kala yihii.


waxa guntii iyo gabgabadii noo soo baxay natijo taas oo aanu halkan idinkula wadaagayno, natijadaasina waxa ay u dhignayd sidan:

2.0 INTERNET

Inkasta oo wasaaradduhu internet-ka ay ka helaan saddex shirkadood uun hadana way ku kala gadisan yihii xaddiga ay ka helaan iyo shirkadda ama shirkaddaha ay badanaa adeegooda isticmaalaan.

Shirkaduhu sida ay wasaaraddaha u siiyaan internet-ka ama looga isticmaalaa waa sidan.

Shirkadaha Internet-ga Bixiya (ISP)



2.1 XADDIGA INTERNET-KA AY WASAARADDUHU KA HELAAN SHIRKADAHA.

Qiimayntan waxa aanu xooga saarnay inaanu ogaano xaddiga ay heshiiska kula galeen am ay ka qaateen shirkadaha, xogtani kuma salaysna inta ay imika ka helaan shirkadahaa kaliya waxa ay ku salaysan tahay inta ay kula heshiyeen.

Hadaba xaddiga internet-ka ay wasaaradduhu ka helaan shirkaduhu sidan ayay u dhigan yahay.

2.2 SHIRKADAH ADEEGA INTERNET-KA (ISP) SIIYA WASAARADDAHA XAWAARAHODA

Wasaaradda	Somtel (mbps)	Somcable (mbps)	Telesom (mbps)
Madaxtooyada JSL	30	30	
Wasaaradda Arimaha Gudaha	4	0	0
Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga	3	5	2.5
Wasaaradda Arimaha Dibada	3	0	0
Wasaaradda Qorshaynta	7	0	0
Wasaaradda Horumarinta Maaliyada	20	25	10
Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	34	0	0
Wasaaradda Hawlaha Guud Iyo Guriyaynta	10	0	0
Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Wadooyinka	5	6	0
Wasaaradda Biyaha	0	0	0
Wasaaradda Gashaandhiga	4	10	0
Wasaaradda Waxbarashada	2	0	0
Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyi-galinta	40	0	0
Wasaaradda Beeraha	2	0	0
Wasaaradda Ganacsiga	2	0	0
Wasaaradda Cadaalada	40	0	0
Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha	10	10	0
Wasaaradda Deegaanka	20	0	0
Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta	4	0	0

Wasaaradda Shaqo-gelinta iyo Arimaha Bulshada	6	10	0
Wasaaradda Maal-gashiga	10	0	0
Wasaaradda Dastuurka	0	15	0
Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta	1	4	0
TOTOL	257 mbps	115 mbps	12.5 mbps

2.2 CILADAHА INTERNETKA WASAARADAHA


2.3.1 LABADII WEEK EE UGU DANBEEYAY SIDA AY WASAARADDUHU ULA KULMEEN CILAD INTERNET

Wasaaraddahu sida ay cilad ula kulmeen labadii week ee ugu danbeeyay



■ Cilad la kulmay ■ Cilad aan la kulmayin ■

2.3.2 CILADA SIDAY SHIRKADAHU INTERNET-KU (ISPs) UGA JAWAAB CELIYAAN



2.4 CAQABADAHU INTERNET-KA WASAARADDHA

2.4.1 CAQABADAHU GUUD

- Wasaaraddo sida ay u badan yihinn xafiiska wasiirka iyo wasiir-xigeenku internet-ka ay helaan waa ka guud ee wasaaradda lagu isticmaalayo taas oo wasiirka iyo wasiir-xigeenka ku keenaysa inaanay is fiican u isticmaali kari waayaan barmaamujyada lagu wada xidhiidho ee maqalka iyo muuqaalka ah sida Microsoft Teams, skype, Zoom iyo barmaamujyada kale ee la midka ah.
- Iyaga oo ay jiraan wasaaraddo la socda oo ilaaliya internet-ka wasaaradda imanaya hadana badanaa wasaaraduhu lama socdaan xaddiga internet-ka ay ka helan shirkadaha.

- Wasaaraddo badan baan lahayn shirkad internet oo backup ah (successor) halka ay internetka ka isticmaalaan hal shirkad oo kaliya taas oo khatar ku ah shaqadooda hadii uu internet-ka shirkadaas khalkhal ku yimaado.
- Badanaa wasaaraddahu waxa ay helaan internet aan la isku halayn Karin (unreliable) kaas oo maalinba xaddi aan ahayn kii shalay ama aan ahayn kay kula heshiyeen ka hela.
- Waxa jira wasaaraddo xaddiga ay helaan iyo isticmaalkoodu (Usage) uu kala badan yahay.
- Wasaaraduhu waxa ay shirkadaha ka helaan internet wadaag (Shared) ah, kaas oo ku keena culays ku yimaada internet-kooda.

2.4.2 CAQABADAHA GAARKA AH

- Wasaaradda caafimaadka internet-ka yimaadaa waa internet speed kiisu yahay 40Mbs, internet kaa kaliya waxa ka faa'idaysta saddex xafiis oo kaliya taas oo keentay inaanu internet-ku aaanu wada gaadhin qaybaha kale ee wasaaradda oo uu ku jiro xafiiska wasiirka iyo wasiirku xigeenka.
- Wasaaradda beeraha Iyana internet-ka lagu isticmaalaa kaliya wuxuu ka shaqeeyaa qayb ka mida wasaaradda halka qaybaha kale aanay helin internet.
- Wasaaradda arimaha dibadu qiimayntii aanu ku samaynay ka dib waxa anagu soo wargaliyeen ina ay jareen somcable unna jareen sabab maaliyad yari ku saabsan, waxa kaliya oo ay imika isticmaalaan somtel.

3.0 SHABAKADA (NETWORK)

Badanaa Network-ga wasaaradduhu tayo ahaan waa mid aad u liita taas oo ay ugu wacan tahay daryeel laan aan waxa daryeel ah la siinayn isku xidhnaanta qaybaha kala duwan ee wasaaraddahu leeyihiin. Haddaba iyada oo badanaa network-ga wasaaradduhu aanu fiicnayn hadana waxa jjira wasaaraddo leh network fiican, wasaaraddahaasna waxa ka mida


- Wasaaradda Macdanta Iyo Tamarta
- Wasaaradda Maaliyada
- Wasaaradda Arimaha Gudaha
- Wasaaradda Cadaalada
- Wasaaradda Qorshaynta

3.1 AMAAN AHAAN WASAARADDAHU QALABKOODU WAA SIDEEE

Amaan ahaan badanaa qalabada network-ga wasaaradduhu waxa wuu yaalaa meel fiican sida ka muuqata warbixintii aanu soo uruurinay, warbixintaa waxa aanu u kala saaranay afar qiyaasood oo kala aha very Good, Good, Poor iyo very poor. Waxa aanay u kala sareeyaan sidan


Very Good	Heerka ugu sareeya ee amaan
Good	Heer dhexe ee amaan
Poor	Heer hooseeya ee amaan
Very Poor	Heerka ugu hooseeya ee amaan

Amaan ahaan wasaaraddaha qalabkoodu waa sidee



4.0 Qalabka (Devices)

Warbixintaanu ku eegaynan qalabada lagu isticmaalo internet-ga wasaaradduhu waxa ay u dhignayd sidan



5.0 XALKA (SOLUTION)

5.1 XALKA DHOW (SHORT TERM):

1. Waa in ay helaan wasaaradduhu laba Internet ugu yaraan si hadii mid cilad ku timaado uu kan kale u sii wado shaqada wasaaradda
2. In Internet hada wasaaradduhu ay haystaan ay control karaan IT Administrators si ay xadiga ugu badan ugu siin dayn karaan xafiiska wasiirka iyo wasiir ku xigeenka.
3. Hadii anay wasaaraddaha kharashku u saamaxayn in ay soo xidhaan labada Internet oo kale duwan waxa waajib noqnaaya in xafiiska wasiirka iyo wasiir ku xigeenu ay backup ahaan u haystaan 4G Moderm.
4. In shirkadaha Internet bixiyaa ay kordhiyaan maalinta shirka xadiga Mb ee ay wasaaradda siiyan ,iyadoo ay IT Administrators ay ka soo gudbinayaan warbixin ah in ay heleen korodhkaasi iyo in kale.
5. In Internet ka gaar ah ka shaqaala waynaha wasaaraddaha loo sameeyo xafiiska wasiirka iyo wasiir ku xigeenka isagoo waliba wata backup-kiisa.
6. In ay wasarad kastaa kula xisaabtanto shirkada siinaysa Internet in ay siisay xadigii ay ku heshiyeeen iyo in kale ,taasina hubinteeda waxa u xil saran IT Administrator-ka wasaaradda Jooga.
7. In ay wasaaradduhu Internet-ka uga helaan shirkadaha qaab aan ahayn qaabka wadaaga ah
8. In ay wasarad kastaa ku jaan goyso xadiga Internet ee ay iibsanayso ,in uu leegyahay baahidooda xafiis.
9. In Wasaaradda Isgaadhsiintu & Teknolojiyaddu kala hadasho shorkaddaha laba shay

Sicirka Iyo sidii wasaaradaha liita loogu heli lahaa internet fiican oo qiime macquul ah

5.2 XALKA FOG (LONG TERM):

1. In dhamaan wasaaradaha dowlada loo sameeyo nidaam Network oo casri ah,si loo fududeeyo habka wada shaqaynta ee wasaaraddaha dhexdooda .
2. In dhamaan Internet wasaaradaha dowlada la iskugu geeyo wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolajiyada ,si halkaasi looga qaybiyo wasaaradaha qaranka oo dhan.
3. In dhamaan wasaraddaha dowlada loo sameeyo INTRANET si kor loogu qaado bad qabka xidhiidh ee wasaaraddaha dowlada.
4. In ay dowladu qorshaan ugu talo gasho in ay qayb ka noqoto Company-yada keena Internetka ,si ay ugu hesho xarumaha dowlada Internet jaban oo la isku halayn karo.